



Nof. 14, 2016

Bulshada DPS ee Qaaliga:

Waxaan rabnay inaan idin muujino mahadcelinta hogaamiyaasha dugsigeena iyo macalimiinteena kuwaas oo taageeray ardaydeena intii lagu jiray waqtiga dareenka xoogan. Bulshadeena kala duwan ee ku dhawaad 90,000, waxaan aqoonsanay arday badan iyo qoyskooda inay ku dadaaleen su'aalhooda gaarka ah, wacalayada iyo cabisda ku saabsan saameynta doorashada. Muhiimada hadafkeena waa hubinta ah inay dugsiyadeena ku yaalan meelo ammni ah halkaaso jinsiyada ardayga, qowmiyada, iyo diinta xaaldda socdaalka aysan ku abuurin wax caqabad ah waxbarashada canuga. Si loo caawiyo hadafkan, waxaan rabnay inaan kula wadaagno jawaabaha su'aalaha soo socda ee ku saabsan xaaladda socdaalka iyo ballan qaadkeena si looga difaaco ardayda midab takoorka iyo dhibaatayn.

Su'aalahaada jawaabtooda:

S: Waxaa maxay saamaynta ay ku leedahay xaaladda socdaalka ee canugeyga?

J: Waxbo! Carruurta waxay leeyihiin xuquuqda dastuuriga ah ee ah inay helaan waxbarasho siman iyada oo aan loo eegaynin xaaladda socdaalka ama xaaladda waalidkooda. Xuquuqdaas ka ma qaadi karo madaxweynaha ama gobolka ama sharci dejiyaalka federaaliga ah.

S: Dugsiyada Dowladda Denver ma weydiyan canuga xaaladda socdaalka marka isaga ama iyada laga diiwaangelinayo?

J: Maya. Dugsiyada Dowladda ee Degmada sida DPS waxa waajib ku ah inay diiwaangeliso ardayda iyada oo aan loo eegaynin xaaladdooda soo galooti iyadoo aan la midib takooraynin jinsiyada, midabka ama asalka wadanka.

S: Dugsiga degmada miyuu la wadaagi doonaa madaxda socdaalka feedeeraaliga ah xaaladda socdaalka ee ardaydeena?

A:Sida kor lagu soo xusay, ma weydino ardayda xaaladda socdaalka marka la diiwaangelinayo iyaga. Si kastaba ahaate, haddii aan ogaano xaaladda socdaalka ardayga, ma la wadaagi doono macluumaadka Muwaadinimada Maraykanka iyo Adeegyada Socdaalka (USCIS).

S: Maxay sameeysa Dugsiyada Dowladda Denver si loo habsado inaan arday ama qoys la midab takoorin ama loo dhibaataynin sabab la xiriirta qowmiyadooda, jinsigooda, diintooda, ama qaranka asalkooda?

J: DPS waxay aaminsan tahay sinaanta hubinta qotodheer – waa mid ka mid ah qiimaynta aasasakeena. Waxaan leenahay xeerka qasabka ah ee dhigaya inaan la takoorin ama la dhibaataynin ardaydeena, qoysaska ama shaqaalaha iyada oo lagu saleynayo jinsiga, qowmiyada, diinta, wadanka asalka iyo heerarka badan ee difaaca fasalada.

S: Maxaan sameeynaya haddii aan dareemo in ahay dhibane takoor ama la dhibaataya?

J: Fadlan soo wargali isla markiiba anshaxa kormeeraha, maamulka dugsiyada, ama kormeeraha guud. Cabashooyinka iyo arrimaha waxaa lagu xarayn karaa iyada oo la isticmaalayo foomamka iyo geedi socodka AC Xeeerka Guddiga (riix [halkan](#)). Waxaan ka qaadaynaa cabashooyinka tallaabo adag si aan u hubino dugsiyadeena inay ahaadan meelo amaan ah.

S: Waa maxay saamaynta degdeg ah ay doorshada ku yeelan doonto aniga ama qoyskeyga haddii aan qabin xaaladda socdaalka sharciga ah?

J: Ma jiri doonto isbeddelo ah sharciyada socdaalka ka hor inta uusan madaxa la wareegin xafiiska Janaayo 2017. Iyo xitaa kadib, sharciyad socdaalka waxaa ansixiya sharci dejiyada ma jirto qaabka lagu ogaanayo haddii sharci dejiyaasha ay sameeyni doonaan isbeddelada sharciga socdaalka.

S: Maxa dhacaya haddii aan ahay helaha DACA?

J: Tallaabada soo Daahinta Imaanshaha Carruunimada (DACA) waxay ku saleysan tahay amarka madaxweynaha. Madaxweynaha cusub wuxuu dooran karaa inuu joojiyo amarka, haddii aad tahay helaha DACA, tixgeli inaad gaarto qareenka socdaalka hadda si loo go'aamiyo haddii aad leedahay isticmaalka si loo dhiso xaaladda socdaalka. Faafaahinta dheeraadka ah waxaa laga heli kara [halkan](#).

S: Maxaan sameeynaya haddii aan rabo inaan fahmo xuquuqahayga socdaalka?

J: Qareenada socdaalka oo kaliya ayaa ku siin kara tallada saxda ah ee ku saabsan xaaladda socdaalka iyo sida loo dabagalo xuquuqa sharciga ah ee laga yaabo inaad qabto. Difaacaada, fadlan ha u raadsanin talo [tuugada](#) ama kuwa kale ee aasn shatiga ka haysanin qareenka socdaalka. Liiska ilaha ayaa laga heli karaa [halkan](#). Sidoo kale, waxaad raadsan kartaa qareenka socdaalka ee Ururka Qareenada Socdaalka Maraykanka [halkan](#) (Ingiriis) ama [halkan](#) (Isbanaash).